

# Isbaddalada Magaalada ku Samayso Adeegyada Qashinka

Waxa aad u baahan tahay in aad ogaatid, waqtiyada, iyo cabbirka gaariga/xulashada adeegga

## Maxuu yahay adeegga qashinka ee ka socdo magaalada?

Adeegga qashinka ka socdo magaalada waa sistem cusub oo habeysan oo lagu aruuriyo qashinka halkaas oo jid kasta/luuq kasta leeyahay hal qashin qaade, sicirada iyo adeegyadana ka siman yaahin Saint Paul. Brograamkaan wuxuu bilaaban doono Oktoobar 2018, wuxuu la shaqeyn doonaa brograamka dib u cusboneysiinta magaalada si loo taageero aragtida muddada-dheer ee Saint Paul oo ah in la yareeyo wasakhda.



Nadiifinta Saint Paul

## Yaa bixiya adeegyada qashinka ee ka socdo magaalada?

Magaalada Saint Paul waxay hoosta kala shaqeysaa kooxda qaadeyaasha qashinka ee shattiga haysta kuwaasoo iminka u adeegga dadka daggan xaafadaha si loo hubiyo in dhib la'aan magaalada lagu wareejiyo aruurinta qashinka.

## Maxay tahay sababta Saint Paul ugu wareegto brograamka qashinka?

Inta badan magaalooyinka waaweyn waxay qabaan brograamyada aruurinta habeysan maxaa yeelay waa hab wanaagsan oo qashinka looga aruuriyo dhamaan dagganeyaasha. In la simmo adeegyada qashinka guryaha waxay u roon tahay deegaanka iyo ammaanka taasoo horumarisa xaafadaha, yareynta baabuurta, wasakhda, qashin qubka sharci darrada ah, iyo dhamaadka jidadka iyo luuqyada.

### Manaafacaadka:

- Macnaha in dhamaan xaafadaha dibadda u soo saaraan gawaarida qashinka isla maalin waa in la yareeyo baabuurta qashin aruurinta ee ku wareegta jidkaada ama luuqyada.
- Fogeynta 2-3 waxyaabaha waaweyn ama wasakhda elataroonigga halkii sanno - laguna soo dhalicin kharash dheeraad ah.
- Dhamaan dagganeyaasha waxaa loo ogol yahay in laga qaado wasakhda deydka marka ay bixiyaan khidmad dheeraad ah.

[stpaul.gov/garbage](http://stpaul.gov/garbage)



City of Saint Paul Public Works  
25 W 4th St - City Hall Annex 1500  
Saint Paul, MN 55102



**Ogaada!**  
La soco kaar khaas ah oo laguugu soo diro boostada!  
Dib u soo celi ugu dambayn **Juun 1, 2018** si aad noogu sheegtid cabbirka gaarigaada qashinka.

### Questions?

Information is available in 170 different languages, call the City of Saint Paul at 651-266-6101 or visit [stpaul.gov/garbage](http://stpaul.gov/garbage)

### ¿Preguntas?

Puede obtener información disponible en español llama a City of Saint Paul al 651-266-6101, o visite [stpaul.gov/garbage](http://stpaul.gov/garbage)

### Su'aalo?

Macluumaadka waxaa lagu helikaraa Soomaali marka la waco City of Saint Paul telefoonka 651-266-6101, ama booqo [stpaul.gov/garbage](http://stpaul.gov/garbage)

### Puas muaj Lus noog?

Cov ntaub ntawv no mauj nyob rau hauv lus hmoob, hu mus rau City of Saint Paul 651-266-6101, los sis, mus xyuas [stpaul.gov/garbage](http://stpaul.gov/garbage)

# All In™ Adeegyada Qashinka 2018



Laga bilaabo Oktoobar 2018, Magaalada Saint Paul waxay bilaabi doontaa aruurinta habeysan qashinka magaalada si loo sugo NADAAFADDA magaaladaha.

### Dhamaan dagganeyaasha iyo xaafadaha waa ka fa'iidi doonaan:

- C** - Consistent, Joogto, tayo, fursadaha adeegga iyo sicir laga siman yahay.
- L** - Livability, Ku Noolaashada magaalada oo soo fiicnaata, iyo adeegyada qashinka laga siman yahay oo si wanaagsan looga shaqeeyo.
- E** - Environmental benefits, Manaafacaadka deegaanka sida yareynta wasakhda qeylada iyo sharci darrada qashin qubka, iyo yaraanta dhamaadka jidadka iyo luuqyada.
- A** - Access, Helitaanka adeeg tayo sare oo qaada qashinka reer kasta oo la siiyo adeeg balaaran, sida aruurinta waxyaabaha waaweyn iyo wasakhda elataroonigga.
- N** - Neighborhoods, Xaafadaha waxay ahaan doonaan kuwo ammaan ah, waxaa yaraada heerarka baabuurta ku sugan jidadka iyo luuqyada

[stpaul.gov/garbage](http://stpaul.gov/garbage)



Nadiifinta Saint Paul

Lagu daabacay 100% warqad la isticmaalay kaddibna dib loo cusboneysiiyay.



# Ma qabtaa su'aalo ku saabsan adeegga qashinka cusub?

## Goormaan ogaan doonaa qaadaha qashinka cusub?

Horaanta Agoosto, khariidooyinka meelaha aruurinta loo xil saaray qaadeyaasha iyo maalmaha aruurinta waxaa lala wadaagi doonaa milkiileyaasha hantida, waxaana la soo gelin doonaa [stpaul.gov/garbage](http://stpaul.gov/garbage).

## Goormaan u baahanahay in aan doorto cabbirka gaariga?

Milkiileyaasha hantida waxay heli doonaan kaarka boostada bisha Maajo si ay u xushaan cabbirka gaariga. Waxaad haysataa saddax siyaabo aad ka dooran kartid heerka adeegga qashinka ugu dambayn **Juun 1, 2018**: soo celi kaarka boostada, gal internetka, ama soo wac nambarka ku qoran kaarka boostada.

Haddii Magaalada aysan war kaa helin adiga ugu dambayn **Juun 1**, waxaa laguugu wareejin doonaa brograamka cusub, waxaana lagu siin doonaa cabbirka gaariga aad iminka haysatid iyo heerka adeegga.

Haddii aadan iminka haysanin adeegga qashinka, aadna dooranin cabbirka gaariga ugu dambayn **Juun 1**, hantidaada waxaa la siin doonaa gaari dhexdhexaad ah. Fadlan xasuuso: Bisha **Juun 1, 2018** kaddib, dagganeyaasha awood uma yeelan doonaan in ay baddalaan cabbirada gaariga iyo heerka adeegga ilaa laga gaaro Janaayo 1, 2019.

Haddii aad tahay kireste, fadlan la xariir milkiilaha hantida ama shirkadda maamusha si aad kala hadashid baahidaada qashinka. Sharuudaha sharciga cusub ee Magaalada awgeed, doorashada cabbirka gaariga iyo adeegga qashinka waxaa samayn kara oo keliya milkiilaha hantida.

## Maxaa dhaca haddii aan ku cusbahay Saint Paul una baahanahay in aan helo adeegga qashinka bisha Oktoobar ka hor?

Haddii aad ku cusub tahay Saint Paul, waxaad dooran kartaa qaade shatti haysta oo isla markiiba kuu bilaaba adeegga qashinkaada ilaa Sateembar 30, 2018, kaddibna waxaad ku wareegi doontaa brograamka cusub ee magaalada marka la gaaro Oktoobar 1, 2018.

Si aad u heshid qaadeyaasha shattiga haysta, tag [stpaul.gov/garbage](http://stpaul.gov/garbage).



## Ma ka bixi karaa ama miyaan deriskeyga la qeybsan karaa adeegyada qashinka?

Ma jirto fursadda ka-bixidda. Sharciga Magaalada ee cusub wuxuu dhamaan milkiileyaasha hantida ka rabaa, kana mid ah hantida kirada unugyada 1-4, in ay yeeshaan adeeg u gaar ah. Haddii reerkaada uusan soo saarin qashin badan, waxaan ku siin karnaa gaari yar oo lagaa qaado todobaad ku dhaaf.

## Cabbirada gaariga:



yar / todobaad ku dhaaf

yar / todobaad kasta

dhexdhexaad / todobaad kasta

weyn / todobaad kasta

## Maxay yahiin kharashka ku baxa cabbirada gawaarida kala duwan?

Milkiileyaasha hantida waxay ka dooran karaan afar heerka adeegga kala duwan si ay ula kulmaan baahidaada reerka (sicirka bil kasta waxaa ku jira dhamaan canshuurta dagmada iyo gobolka):

Yar (35 galan)	Waxaa la aruuriyaa todobaad ku dhaaf	\$20.28/bil kasta
Yar (35 galan)	Waxaa la aruuriyaa todobaad kasta	\$23.44/bil kasta
Dhexdhexaad (65 galan)	Waxaa la aruuriyaa todobaad kasta	\$32.03/bil kasta
Weyn (95 galan)	Waxaa la aruuriyaa todobaad kasta	\$34.15/bil kasta

Sannad kasta, khidmad la'eg \$24.60 (\$2.05/bil kasta) ayaa lagu darri doonaa bayaanka canshuurta hantida Dagmada Ramsey si loo bixiyo kharashka gawaarida, maamulka brograamka, iyo dadaalka xariirinta iyo aqoonta.

# Sidee ayay tani ii quseysaa?

## Dhamaan Milkiileyaasha Hantida:

Sharciga Magaalada cusub wuxuu dhamaan milkiileyaasha hantida Saint Paul daggan 1-4 unug ka rabaa in ay ka qeybgalaan brograamka qashinka magaalada. Waxaad u baahan doontaa in aad:

- dooratid cabbirka gaariga iyo heerka adeegga guriga ugu dambayn **Juun 1**.
- habsatid in si wanaagsan loo arki karo nambarda guriga ee ku dhaggan garaashyada.

## Milkiileyaasha Hantida/Maamuleyaasha Hantida la Daggan Yahay:

Talaabadaha quseeya dhamaan milkiileyaasha hantida kaddib, fadlan la xariir cidda daggan si aad kala hadashid baahidaada adeegga qashinka. Waxaad u baahan doontaa in aad:

- la timaadid hal gaariga qashinka halkii unug - lama ogola in la qeybsado.
- ahaatid qofka lagala xariiro biilasha qaadidda qashinka; adiga oo bixiya xisaabta saddaxdii bil hal mar.
- la shaqeytid cidda daggan guriga iyo qaadaha si aad wax uga qabatiin arrimaha aruurinta qashinka.

## Ku Socoto Kireesteyaasha!

Kireesteyaasha, la xariira maamulaha hantida/milkiilaha hantida ama shirkadda maamusha hantida sida ugu dhakhsiyaha badan si aad kala hadashid baahidaada adeegga qashinka.

Dhamaan milkiileyaasha hantida 1-4 unug waxaa laga rabaa in unug kasta ka qeybgalo brograamka qashinka magaalada. Milkiileyaasha hantida ayaa mas'uul ka ah in ay xushaan cabbirka gaariga.



Nadiifinta Saint Paul  
[stpaul.gov/garbage](http://stpaul.gov/garbage)

